

Hubinta Aaladdahaaga

Kheyraadkani wuxuu ku siinayaa qaar ka mid ah tallaabooyinka ugu horreeya ee wax ku oolka ah ee lagu ilaalinayo aaladaha noocyada caadiga ah ee raadraaca aaladda wuxuuna daboolaa tallaabooyinka sida daminta Bluetooth, WiFi-ga iyo wadaagga goobta; Magacaabista aaladdaada; hubinta fayras-yada iyo oggolaanshaha ababka; iyo samaynta dibu tirtridda aaladda.



Kuwani waa talooyin guud oo ku saabsan ilaalinta badqabka aaladdaada. Tallaabooyinka saxda ah way ku kala duwanaan karaan aaladuhu waxayna isbeddeli karaan waqti kadib.



iPhone-ada iyo iPad-ada, waxa aad inta badan ka heli kartaa setting-ka adiga oo taabanaya "Settings" ee Home Screen, kaddibna hoos u jiidaya si aad u muujiso barta raadinta. (Wixii caawinaad ah, ka eeg <http://tiny.cc/iphonesearch>.)



Aaladaha Android-ka, kor uga riix Home Screen-ka: barta raadinta ayaa soo bixi doonta oo ay ku qoran tahay "Search Your Phone and More". Ku qor setting-ka aad raadinayso barta raadinta.

Ku qor setting-ka aad raadinayso barta raadinta

Dammi Bluetooth-ka iyo WiFi-ga marka aanad joogin isticmaalayn. Marka aanad isticmaalayn, dammi adiga oo aadaya **Settings** ama taabanaya astaanta **Bluetooth** iyo **WiFi**.

Waxa kale oo aad aadi kartaa setting-ka Bluetooth-ka (**Setting > Bluetooth**) oo raadi aalad kasta oo ku xidhan talefankaaga. Haddii ay jiraan kuwo aanad aqoonsanayn, ka bixi iyaga.

Dammi wadaagista goobta

Wadaagista goobta iyo abka sida "Find my phone" wali way shaqeeyaan haddii teleefankaagu dansan yahay, markaa waa inaad damisaa goobaha. iPhone-ka, fur **Settings > Privacy > Location Services** ama raadi "Location Services", oo dammi wadaagista goobta.

Aaladda Android-ka, fur **Maps**, taabo sawirka borrofaayl kaaga kadibna Location sharing. Taabo sawirka profile ee qof kasta oo *aysan ahayn* inuu arko goobtaada, kadibna taabo "Stop".

Astaanta furaha



Setting-ka



Bluetooth-ka



WiFi-ga



Toggle-ka



Maabka



Saddexda dhibcood

Hubinta Aaladdahaaga

Dib magaca uga beddel aaladdahaaga

Xitaa haddii aadan weligaa bedelin magaca taleefankaaga, weli mid aad ku garato ayaa ku qoran. iPhone-ka, taabo **Settings** > General > About > Name, ama raadi "Name", dabadeed geli magac cusub oo taabo "Done".

Aaladda Android-ka, taabo **Settings** > About phone > Magaca aaladda, ama raadi "Name", kadib geli magaca cusub oo taabo "OK".

Hubi fayrasyo

"Fayrasyo" macnaheedu waa ababka u oggolaanaya qof kale inuu basaaso aaladdaada. Hubi si aad u aragto haddii ay jiraan abka aanad garanayn. iPhone-ka, midig u riix Home Screen-ka ilaa aad ka aragto App Library.

Taabo sanduuqa raadinta ee sare ee shaashadda, kadibna dhex gal liiska abka oo ka saar wax kasta oo aadan garanayn.

Aaladda Android-ka, aad **Settings** > Apps iyo notifications> Arag dhammaan ababka, ama raadi "Apps".

Waxa kale oo jira abab aad isticmaali karto sida *Certo* iyo *Incognito* kuwaas oo ka iskaangarayn doona aaladdaada fayrasyada, laakiin waa inaad ogaataa in mar walba ay jirto fursad ah in fayras uu wali ku jiro taleefankaaga.

Hubi ogolaanshaha abka

Waxaad sidoo kale ka joojin kartaa ab kasta inuu ururiyo ama la wadaago waxyaabaha sida goobtaada. iPhone-ka, taabo **Saddexda dhibcood** > Privacy & Security > App Privacy Report si aad u aragto waxa ab kasta uu wadaagayo, ama raadi "Privacy Report". Taabo abka kasta si aad u beddesho setting-ka.

Astaanta furaha



Setting-ka



Saddexda dhibcood



Toggle-ka

Aaladda Android-ka, ka soo deji abka *DuckDuckGo* Play Store kadibna fur. Taabo **Settings** > App Tracking Protection kadibna u leexi **toggle-ka** dhinac midigta.

Dibu tirtiridda taleefanka

Haddii aad samaysay wax kasta oo kale oo aad weli u malaynayso in qof uu la soconayo taleefankaaga, waxaad dibu tirtiri kartaa taleefanka. Si kastaba ha ahaatee, tani waxay tirtiri doontaa dhammaan xogta, oo ay ku jiraan caddaymo kasta oo ku jira telefoonkaaga. Haddii aad dibu tirtirto taleefankaaga, ma soo celin kartid kaydka kaydsan sababtoo ah wax kasta oo dabagal kugu hayay ayaa dibu soo noqon kara: waa inaad si buuxda dibu bilowdaa.

Haddii aad hubto inaad rabto inaad tan sameyso, iPhone-ka, waxaad ku dhufan kartaa **Settings** > General > Transfer ama Reset iPhone, kadibna Erase All Content and Settings. Waxaad sidoo kale raadin kartaa "Reset" si aad u hesho settingkan.

Haddii aad leedahay iPhone waxa kale oo aad shidi kartaa Lockdown Mode, kaas oo kaa ilaalinaya inta badan noocyada fayrasyada. Waxa kale oo uu xaddidayaa inta aad isticmaali karto ababka sida FaceTime iyo Safari. Ka eeg <https://support.apple.com/en-ca/HT212650> wax kale oo badan oo ku saabsan Lockdown Mode.

Aaladda Android-ka, ku bilow adiga oo aadaya **Settings**, kadibna raadi "Reset". Raadi natiijada sida "Factory reset" ama "Erase all data" deedna taabo.

Financial contribution from



Public Health
Agency of Canada

Agence de la santé
publique du Canada

Wada xidhiidhka si badbaado leh

Kheyraadkani wuxuu ku siinayaa qaar ka mid ah tallaabooyinka ugu horreeya ee la taaban karo ee loogu wada xiriiro si badbaado leh onlaynka si looga fogaado noocyada caanka ah ee raadraaca onlaynka wuxuuna daboolayaa tallaabooyinka sida ka bixista akoonnada, daminta goobta wadaagga, dibu-eegista settingka asturnaanta, iyo beddelidda furayaasha sirta ah.



Kuwani waa talooyin guud oo ku saabsan ilaalinta badqabka aaladdaada. Tallaabooyinka saxda ah way ku kala duwanaa karaan aaladuhu waxayna isbeddeli karaan waqti kadib.



iPhone-ada iyo iPad-ada, waxa aad inta badan ka heli kartaa setting-ka adiga oo taabanaya "Settings" ee Home Screen, kaddibna hoos u jiidaya si aad u muujiso barta raadinta. (Wixii caawinaad ah, ka eeg <http://tiny.cc/iphonesearch>.)



Aaladaha Android-ka, kor uga riix Home Screen-ka: barta raadinta ayaa soo bixi doonta oo ay ku qoran tahay "Search Your Phone and More". Ku qor setting-ka aad raadinayso barta raadinta.

Ka bax dhammaan akoonnada

Waxaa laga yaabaa inaad diiwaangashan tahay ababka qaar in ka badan hal aalad. Waa kan sida meel walba looga saaro *Facebook*: taabo **Saddexda dhibcood** kadibna **Settings**, kadibna "Password and Security" kadibna "Accounts Center". Taabo "Password and Security" kadibna "Where You're Logged in".

Hadda waxaad arki doontaa dhammaan akoonnada *Facebook-gaaga*, *Instagram-gaaga* ama *WhatsApp-gaaga*. Taabo mid kasta si aad u aragto aaladda ku jirta, kadibna taabo "Log Out" mid kasta oo aan ahayn telefoonkaaga.

Astaanta furaha



Saddexda dhibcood



Setting-ka



Saddex dhibcood oo toosan



Toggle-ka

Wada xidhiidhka si badbaado leh

Dami wadaagista goobta ee baraha bulshada

Tani waa muhiim haddii aad isticmaasho *Snapchat*, taasoo ku tusinaysa meesha aad ku sugan tahay maabka. Si aad taas u samayso, fur *Snapchat* oo taabo astaanta borofaylkaaga. Marka xigta taabo **saddexda dhibcood ee taagan** ee dhanka sare ee midig oo hoos ugu dhaadhac qaybta "Who Can..." Haddii aad taabato "See My Location" waxaa soo boodi doona qoraal ay ku qoran tahay "Ghost Mode." U **Beddeli** taas "On".

Facebook-ga ama *Instagram-ga*, waxaad ka damin kartaa goobta adigoo taabanaya **Settings** > Privacy > Location Services kadibna taabo u **Beddel** ta xigta. Inta badan shabakadaha kale ee bulshada waxay dhigaan meelo la mid ah goobaha sida "Privacy" ama "Safety".

Dibu-eeg goobaha gaarka ah

Dhammaan akoonnada shabakada bulsheed waxay leeyihiin setting gaar ah, kuwaas oo aad inta badan ku gali karta adigoo taabanaya **Settings** kadibna wax la mid ah "Privacy", "Privacy and Security" ama "Audience." Hubi in loo dhigay inay keliya muujiso waxa aad u gudbisno Asxaabta.

Beddel furaha sirta ah ee kaydka cloud

Haddii aad u isticmaasho wax kaydintaada sawirada ama muuqaalada, sida *iCloud* ama *Google Drive*, hubi inaad beddeshay furaha sirta ah si aanu qof kale u gelin.

Astaanta furaha



Saddexda
dhibcood



Setting-ka



Saddex
dhibcood oo
toosan



Toggle-ka

Isticmaalka Birawsarka si Badbaado leh

Kheyraadkani wuxuu ku siinaya qaar ka mid ah tallaabooyinka ugu horeeya ee wax ku oolka ah ee si badbaado leh wax looga baadho khadka oo looga fogaado qaababka dabagalka onlaynka wuxuuna dablooayaa tallaabooyinka sida isticmaalka birawsarada diirada saaraya arrimaha gaarka ah, baadhista khaaska ah/incognito, nadiifinta isticmaalkii hore, iyo ku saxiixida iimaylo qarsoodi ah iyo fure sireed xoogan.



Kuwani waa talooyin guud oo ku saabsan ilaalinta badqabka aaladdaada. Tallaabooyinka saxda ah way ku kala duwanaa karaan aaladuhu waxayna isbeddeli karaan waqti kadib.



iPhone-ada iyo iPad-ada, waxa aad inta badan ka heli kartaa setting-ka adiga oo taabanaya "Settings" ee Home Screen, kaddibna hoos u jiidaya si aad u muujiso barta raadinta. (Wixii caawinaad ah, ka eeg <http://tiny.cc/iphonesearch>.)



Aaladaha Android-ka, kor uga riix Home Screen-ka: barta raadinta ayaa soo bixi doonta oo ay ku qoran tahay "Search Your Phone and More". Ku qor setting-ka aad raadinayso barta raadinta.

Isticmaal birawsarka diirada saaraya asturnaanta

Birawsarada sida *Firefox* iyo *DuckDuckGo* waxaa loo qaabeeyey iyadoo maskaxda lagu hayo asturnaanta, oo ay kuu dabagalaan sida ugu yar ee suurtoogalka ah. Isku day inaad isticmaasho mid ka mid ah halkii aad ka isticmaali lahayd birawsarr-ka la socda aaladdaada.

Birawsarka gaarka ah ama qarsoodiga ah

Inta badan birawsarada waxay leeyihiin qaab **Gaar ah** ama **Qarsoodi** ah. Habkani wuxuu ka ilaaliyaa birawsarka laftiisa inuu duubo boggaga aad booqatay, laakiin kama joojinayo bogaggaas (ama bixiyahaaga internetka, ama barnaamijyada kale ee aaladdaada) inay duubaan waxaad samaynayso.

Astaanta furaha



Qaabka
gaarka ah ama
qarsoodiga ah



Setting-ka

Isticmaalka Birawsarka si Badbaado leh

Nadiifi taariikhdaada

Raadi "Taariikhda". Haddii aad leedahay akoonka *Google*, sidoo kale waad nadiifin kartaa isticmaalkii hore ee *Google* iyo *YouTube*. Tag **myactivity.google.com** oo dami "Web & App Activity", "Location History" iyo "Youtube History".

Si aad u nadiifiso taariikhda birawsarka Safari, taabo **Setting** kadibna Safari > Clear History iyo Website Data, ama raadi "Website Data".

Ku soo gal iimayl qarsoodi ah

Websaydyo badan iyo adeegyo ayaa raba inaad siiso ciwaan iimayl si aad isu diiwaangeliso. Haddii aadan u baahnayn inaad gujiso xiriirinta xaqiijinta, waxaad isticmaali kartaa ciwaanka iimayl been abuur ah oo laga sameeyay **Sharklasers.com**.

Waxa kale oo aad samayn kartaa cinwaanka *Protonmail* oo bilaash ah, gaar ah oo ammaan ah si aadan u isticmaalin ciwaan qof kale garan karo.

Isticmaal fure-sireedyo adag

Waxaad samayn kartaa furaha sirta ah oo adag adiga oo ku bilaabaya weedh aad xusuusan karto (sida "Waan jeclahay muuska") kadibna u rogaya xarfaha qaarkood lambarro ama xarfo (sida xidig ama calaamadaha cajaa'ibka sidoo kale samee !LikeBan@nas).

Laakin ha u isticmaalin furaha sirta oo isku mid ah akoonno kala duwan. Waxaa si gaar ah muhiim u ah inaad u isticmaasho fure-sireed adag oo ka duwan akoonkaaga iimaylka ugu weyn, maadaama iimayllada soo kabashada akoontiga halkaas lagu diri doono. Waxa kale oo aad isticmaali kartaa maamulaha fure-sireedka sida *1Password*. Haddii aad sameyso, hubi in furaha sirta ah ee aad u isticmaalayso uu yahay mid xooggan oo ka duwan dhammaan ereyada sirta ah ee kale.

Astaanta furaha



Qaabka
gaarka ah ama
qarsoodiga ah



Setting-ka



Financial contribution from



Public Health
Agency of Canada

Agence de la santé
publique du Canada